Latvia

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad tahay qof weyn (kaweyn 18 sano jir)
- aad codsatay magangalyo caalami ah (sidoo kale loo yaqaan magan-galyo) gudaha Latvia oo imika aad tahay codsade magangalyo caalami ah.

SOMALI

# TUSMADA


Waa maxay soo-dhaweyn? 3

Maxaad heli doontaa? 6

Xuquuqda daryeel caafimaad 7

Xuquuqda waxbarasho ee carruurta 10

Xuquuqda shaqo 11

Casharada luuqada iyo tababarka farsamada gacanta 12

Dhukumentigani wuxuu sheegayaa inaad tahay codsade magangalyo caalami ah 13

Halkee ayaad joogi doontaa? 13

Shuruudaha codsadaha lagu xidhi karo 18

Waa maxay waajibaadkaaga soo dhaweynta? 19

Maxaa dhacaya haddii aanad u hogaansamin waajibaadkaaga? 20

Maxaa dhacaya haddii aad u safartid waddan EU+ ah oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta? 21

Maxaa dhacaya marka dib laguugu celiyo dalka kale oo ka tirsan EU+ waddan ah oo aad ka tagtay bilaa fasax? 21

Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan maamulka 22

Waxaad heli kartaa caawimo sharci 23

Faahfaahinta meelaha lagala xidhiidhi karo 24

## WAA MAXAY SOO-DHAWEYN?

Soo-dhaweyn waa taageerada aad heshid codsade ahaan inta aad sugaysid in masuuliyiintu soo gabogabeeyaan baadhitaanka codsigaaga magangalyada caalamiga ah. Waxa kujira xuquuqaha iyo waajibaadka lagu sharxay buug yarahan.

Guddah Latvia maamulka ka masuulka ah soo-dhaweyntu waa Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka.

Maamulka ka masuulka ah baadhitaanka codsigaaga magangalyo waa  Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka

Saraakiisha Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda waxay kaa codsan doonaan inaad xaqiijiso oo aad saxiixdo inaad heshay macluumaadka ku jira buug-yarahan. Haddii wax kuu caddaadeen la' yihiin, fadlan weydii saraakiisha Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda.



**Waad ku badqabtaa wadankan.**

Inta aad joogto, saraakiisha Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda ama Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka waxay ku wargelin doonaan adeegyada soo dhaweynta iyo taageerada aad heli karto, iyadoo ku xiran xaaladdaada.



Waxaad weydiin kartaa haayadaha kale macluumaadka iyo caawimada bilaash ah. Waxaad ka heli kartaa liiska haayadaha dhammaadka buug yarahan.



Haddii loo baahdo, turjubaan ayaa kaa caawin doona inaad la xiriirto saraakiisha adigoo isticmaalaya luqad aad fahanto. Turjubaanku ma shaacin doono waxa aad sheegto cid kale.

**Waxaad ka heli kartaa macluumaadka nidaamka magangalyada iyo shuruucda la raacayo buuga kale oo gaara.**

**Adigu waxaad imika Latvia, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27 ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.

## Fiiro gaar ah!

Codsadayaashu waxay leeyihiin xuquuqo iyo waajibaad soo-dhaweyn oo isku mid ah dhammaan waddamada EU+ ah.

Shuruucdani waxay khuseeyaan codsashada magangalyo iyo u safrida waddamada EU+ ee kale.

- **Waa inaad ka diiwaangelisaa codsiga magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timid,** haddii maasuliyiintu aanay kuu sheegin wax kale.
- **Kaliya hal waddan oo EU+ ah ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo.** Masuuliyiinta gudaha Latvia ayaa raaci doona nidaamka si loo go'aamiyo in wadan EU+ ah kamasuul yahay codsigaaga mangan-galyo.
- **Waa inaad joogtaa Latvia. Uma safri kartid wadan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta.** Codsigaaga mangan-galyo ee Latvia waa la joojin karaa. Xuquuqdaada dhaqdhaqaaqa dalka kale ayaa la xaddidi karaa oo adeeggyada soo-dhaweynta ayaa la joojin karaa.

# MAXAAD HELI DOONTAA?

Inta ay maamulka ka baarayaan codsigaaga ilaalinta caalamiga ah, iyadoo la tixgelinayo xaaladdaada dhaqaale, haddii lagu dejiyo xarunta hoyga codsadayaasha magangalyada, waxaad heli doontaa:



- hoy



- agabka nadaafada gaarka ah



- cunto



- dhar



- lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay **daryeelka caafimaad ee daruuriga ah.** Tani waxa kujiri kara tusaale, booqashooyinka kalkaaliso ama dhakhtar, baadhitaanka xanuunada darran iyo xaaladaha lala noolaado cudur, daaweynta uu qoray dhakhtar iyo caawimada caafimaadka maskaxda.



**Haddii aad leedahay dhibaato caafimaad, u sheeg shaqaalaha.**

Haddii aad ku jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah ama aad dhaawacanto oo aad u baahan tahay daaweyn degdeg ah, u sheeg saraakiisha ama wac lambarka degdegga ah ee bilaashka ah 112.



Waxaa lagu samayn doonaa baaritaan caafimaad oo uu sameeyo dhakhtar ama kalkaaliye. Waxay qiimeyn doonaan caafimaadkaaga waxayna ku siin doonaan caawimaad. Waxay ku weydiin doonaan su’aalo ku saabsan xaaladahaaga caafimaad ee hadda ama kuwii hore, taariikhda tallaalladaada, iyo daawooyinka aad qaadato. Sidoo kale waxay ku weydiin doonaan dhaawacyo, xanuun, xaalado caafimaad ama walaacyo kasta oo aad qabto.

Latvia gudaheeda, ka dib marka la diiwaangeliyo codsigaaga magangalyada oo lagu dejiyo xarun hoy, waxaa lagugu samayn doonaa baaritaan qaaxada, kaas oo qasab ah.

## Waxaad xaq u leedahay inaad hesho taageero gaar ah haddii aad leedahay baahiyo gaar ah.







**Wargali shaqaalahaaga haddii:**

- aad dhaawacan tahay ama xanuunsanayso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- ay kuu sugan yihiin xubno qoyskaaga ka mid ah oo u baahan caawimo gaar ah
- aad qabto naafanimo (tusaale ahaan, dhaqdhaqaaq xaddidan, maqalka oo daciif ah, ama aragga oo liita)
- aad si joogto u dareento cadho badan, welwelsan tahay ama walaacsan tahay, seexan weydo ama aad waajahayso fikirro xun
- aad la ildaran tahay dhibaato ama jirdil hore
- aad dareento inaanad ammaan ahayn, dhibtoonayso ama aad ka baqayso qof, ha ahaado qof ajnabi ah ama qof aad taqaan
- lagugu qasbay ama lagugu qasbayo inaad samayso waxyaabo aadan rabin
- aad dareento inaanad badqabin sababtoo ah diintaada, qofka aad jeceshahay, sida aad u labisato ama u dhaqanto
- aad ka yar tahay 18 jir, oo aadna timid adigoon la socon waalidkaa kaligaa ama waxaad la socotay xubno kale oo qoyskaaga ah.

Taageerada gaarka ah kaliya waxa lasiin karaa marka shaqaaluhu Ilaalada Xuduudaha Dowladda ama Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka ogyihiin baahiyahaaga gaarka ah.





Saraakiisha Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda iyo Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka waxay ku weydiin doonaan su'aalo si ay u:

- u qiimeeyaan **baahiyahaaga gaarka ah**
- u aqoonsadaan **nooca taageerada gaarka ah** ee kugu habboon.

Tan waxaa loo yaqaan qiimeynta baahiyaha gaarka ah.

Turjumaan ayaa kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqad aad fahmayso, haddii ay daruuri tahay.



**Haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah, mar walba la xiriir saraakiisha Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda ama Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka.**

Waxaad heli doontaa taageeradan inta ay maamulka u arkaan inay lagama maarmaan tahay.

Waxaad ku kalsoonaan kartaa dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha, iyo saraakiisha Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda iyo Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka, waxaana xor u tahay inaad si furan ula hadasho. Dhammaan macluumaadka waa la asturi doonaa, taasoo macneheedu tahay lalama wadaagi doono dadka kale iyadoon lagaala heshiin.

Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.

# XUQUUQDA WAXBARASHO EE CARRUURTA

Dhammaan carruurta, wiilal iyo gabdho ka yar 18 sano, waxay xaq u leeyihiin waxbarasho.

Waxay sidoo kale xaq u leeyihiin inay helaan taageero, tusaale ahaan barashada luqadda qaranka.



Latvia gudaheeda, codsadayaasha magangalyada waxay heli karaan waxbarasho dugsi-hore laga bilaabo da'da 5 sano, sidoo kale fursad ay ku helaan waxbarashada aasaasiga ah (ilaa 18 sano) iyo waxbarashada sare.

**Waalidiintu waxaa waajib ku ah inay hubiyaan waxbarashada ilmahooda, oo ay ku jiraan inay la shaqeeyaan hay'adda waxbarashada.**

# XUQUUQDA SHAQO

Iyada oo ku xiran xaaladdaada, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato inaad ka shaqeyso saddex bilood kadib marka la diiwaangeliyo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah ee Latvia.

Saraakiisha Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka, shaqaalaha bulshada, iyo lataliyeyaasha ayaa ku wargelin doona xeerarka ka dhaqan galka ah Latvia.



Waxaa jira ka reeban qaar; tusaale ahaan, laguma oggolaan doono shaqo haddii aadan la shaqayn maamulka.



Dhammaan wiilasha iyo gabdhaha ka yar 15 sano looma oggola inay shaqeeyaan (marka laga reebo xaalado gaar ah oo laga yaabo in laga oggolaado shaqo laga bilaabo 13 jir).

## KOORASYADA LUUQADA IYO TABABARKA XIRFADAHA

Iyadoo ku xiran xaaladdaada, waxaad ka qaybgeli kartaa:

- koorasyada luuqada;
- koorsooyinka waxbarashada madaniga ah;
- koorasyo aad ku baranayso xirfado cusub.



Shaqaaluhu waxay ku wargelin doonaan koorsooyinkan iyo goorta aad bilaabi karto.

## DHUKUMENTIGA CADDEYNAYA INAAD TAHAY CODSADE ILAALINTA CAALAMIGA AH



Waxaad heli doontaa dukumenti rasmi ah oo loo yaqaan dukumentiga aqoonsiga codsadaha magangalyada, kaas oo caddeynaya inaad tahay codsade ilaalin caalami ah. Dhokumantigan wuxuu muujin doonaa magacaaga iyo xogtaada shaqsiyadeed. Waa inaad sidataa wakhti walba.

Kani ma'aha dhokumanti aad ku safri karto.

Dukumentigan waxaa bixiya Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda kadib marka la diiwaangeliyo codsiga magangalyada.

**Fiiro gaar ah!** Ka taxaddar inaadan lumin oo ha siin qof kale.

## HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA?

Meesha aad ku noolaan doonto inta codsigaaga ilaalinta caalamiga ah la baarayo waxay ku xiran tahay arrimo badan.

Haddii aadan ku jirin xabsi ama aan lagaa rabin inaad ku sugnaato meel gaar ah, isla markaana aadan haysan lacag kugu filan oo aad ku masruufto naftaada iyo xubnaha qoyskaaga, waxaa lagu dejin doonaa xarunta hoyga codsadayaasha magangalyada ee Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka.

Waxaad sidoo kale adiga iyo qoyskaaga diyaarsan kartaan hoy aad adigu iska bixiso kharashkiisa. Dawladdu ma bixin doonto kharashaadkaas.

**Meel kasta oo aad joogtid, waxaad xaq u leedahay inaad:**



- **badqabto:** qofna, xataa shaqaalaha, looma oggola inuu kuu hanjabo, caayo, ama dhibaateeyo.



- **la joogto saygaaga, xaaskaaga, carruurtaada iyo walaalahaga kayar 18 ama qaraabo qof weyn ah oo u baahan daryeel joogto ah**
- **la joogto qaraabadaada,** haddii aad tahay qof weyn oo u baahan daryeel joogto ah



- hesho caawimaad si aad **ula xidhiidhid** qoyskaaga **oo aadna isku deydo inaad raadiso iyaga, haddii aadan garanayn meesha ay joogaan**.

**Waxaad soo gudbin kartaa cabasho rasmi ah haddii aad aaminsan tahay in:**



- Mid ka mid ah shaqaalaha uu ku hanjabay, ku aflagaadeeyay, ama ku waxyeelleeyay.
- ficillada ama ka-fadhiisiga ficil ee sarkaal ayaa kugu sababay waxyeello;
- xuquuqdaada aasaasiga ah iyo baahiyahaaga muhiimka ah lama buuxinayo.

Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda iyo Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka ayaa ku wargelin doona sida loo gudbiyo cabasho rasmi ah.


Mar walba waad weydiin kartaa maamulka, hay'adaha aan dowliga ahayn ama Xafiiska Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

Waxaad dooran kartaa inaad ku noolaato hoy gaar ah haddii aad haysato dhaqaale kugu filan oo aad isku masruufi karto, isla markaana aysan maamulka go'aamin inaad ku noolaato xarun hoy oo gaar ah. Xaaladdan, waxaa sidoo kale laguu oggolaan karaa inaad la joogto qoyskaaga ama asxaabtaada.

Dawladdu ma bixiso kharashka hoyga gaarka ah.



**Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda waxay go'aansan karaan inaad ku sugnaato gobol juqraafi ah oo gaar ah. Xaaladdaas, waxay si qoraal ah kuugu wargelin doonaan adigoo adeegsanaya luqad aad fahanto.**




Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda waxay go'aansan karaan inaad ku sugnaato gobol juqraafi ah oo gaar ah. Xaaladdaas, waxay si qoraal ah kuugu wargelin doonaan adigoo adeegsanaya luqad aad fahanto.

Waxaad si xor ah ugu dhex wareegi kartaa gudaha gobolkan (dhulka maamulka).

Goobtan juqraafiyeed waxaa lagu qori doonaa dhukumantigaaga, isagoo sheegaya inaad tahay codsade ilaalin caalami ah.

Haddii aad u baahato inaad ka baxdo gobolkaas muddo gaaban, waa inaad fasax ka codsataa Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda. Waxaad codsan kartaa inaad ka tagto kaliya sababo qoys oo cadaalad ah, degdeg ah oo culus, ama daaweyn caafimaad oo lagama
maarmaan ah oo aan laga heli karin goobta juqraafiyeed ee aad ku sugan tahay. Masuuliyiintu waxay ansixin karaan codsigaaga ama ma oggolaan karaan.

Haddii codsigaaga la diido, waad racfaan ka qaadan kartaa go'aankan.

**Iyada oo ku xiran xaaladdaada, Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda waxay go’aamin karaan inaad ku sugnaato goob gaar ah (tusaale ahaan, xarun hoy oo gaar ah).**



**Waxaa laguu oggolaan doonaa inaad ka baxdo goobtaas gaarka ah, balse iyadoo lagu xaddidayo shuruudo gaar ah. Joogitaankaaga goobtaas si joogto ah ayaa loo hubin doonaa.**

Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda waxay qaadi karaan go’aankan sababo kala duwan awgood. Tusaale ahaan:

- waxaa jirta khatar ah inaad baxsato
- dalka kale ayaa laga yaabaa inuu masuul ka noqdo baadhista codsigaaga magangalyo, waxaana masuuliyiintu u arkaan inaad baxsato
- waxaad ka tagtay dalkaas adigoon oggolaansho haysan, waa lagugu soo celiyey, waxaana jirta khatar ah inaad mar kale baxsato.

**Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda waxay si qoraal ah kuugu wargelin doonaan go’aankan, iyagoo adeegsanaya luqad aad fahanto. Waxay kuu sheegi doonaan xuquuqdaada, waajibaadkaaga iyo cawaaqib xumada ka dhalan karta haddii aadan ixtiraamin go’aanka.**

Waxaad ka qaadan kartaa racfaan go'aankan.

Waxaad weydiin kartaa Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda haddii aad si ku-meel-gaar ah ugu joogi karto meel kale muddo xaddidan. Masuuliyiintu waxay ansixin karaan codsigaaga ama ma oggolaan karaan. Haddii codsigaaga la diido, waad racfaan ka qaadan kartaa go’aankan.

**Fiiro gaar ah!** Haddii aadan ixtiraamin go’aanka ku saabsan inaad ku nagaato meeshaas gaarka ah iyo xaddidaadaha lagugu soo rogay, isla markaana ay jirto khatar ah inaad mar kale baxsato, waa laguu xiri karaa.

## SHURUUDAHA CODSADE LAGU XIDHI KARO

Xadhig macneheedu waa in lagu geeyo xarun gaara oo aanad si xor ah u socon karin. Masuuliyiintu waa inay haystaan sabab sax ah oo ay kugu xidhaan. Waa inay hubiyaan in aan xalkale macquul ah laheyn xaaladaada. Maamulka Ilaalada Xuduudaha Dowladda ayaa tixgalin doona xaaladaada gaarka ah kahor go'aaminta..



Sababaha laguu xidhaayo waxay noqon karaan, tusaale ahaan:

- qodobbada muhiimka ah ee codsigaaga magangalyo (tusaale, aqoonsigaaga) lama xaqiijin karo adigoon lagu hayn.
- maad ixtiraamin waajibaadka inaad joogtid goob gaara, waxaana jirta halis inaad baxsatid markale iyo masuuliyiinta oo aan kulasoo xidhiidhi karin
- waxaad heshay go'aan in laguu gudbiyo wadan kale oo EU+ ah kana masuula baadhista codsigaaga magan-galyo waxaana jirta khatar inaad baxsato ah kahor gudbinta
- waxaad keenaysaa halis amni.

haddii lagu xidho, waxaad qaadan kartaa racfaan. Waxaad codsan kartaa caawimo sharci oo bilaasha iyo matalaad.

# WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGA SOO DHAWEYNTA?

**Hoos waxa ah qaar kamida waajibaadka ay tahay inaad u hogaansantid.**

- ✅ Raac shuruucda wadankan.
- ✅ Joog Latvia oo ha u safrin dal kale oo EU + ah adigoon helin oggolaanshaha maamulka.
- ❌ Ha ka bixin ogolaansho la'aan goobta juqraafiyeed [ikhtiyaari iyadoo ku xidhan haddii MS ay ku dabaqdo fanka 8] ama goob gaar ah taasoo maamulku ay dhaheen waa inaad joogtaa.
- ✅ Si buuxda ula shaqee saraakiisha maamulka oo raac tilmaamahooda.
- ✅ Raac xeerarka goobta aad deggen tahay.
- ✅ Ixtiraam dadka kale ee deggen, saraakiisha iyo dadka kale.
- ✅ Fadlan u sheeg Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda iyo Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka ilahaaga dhaqaale.
- ✅ Sidoo kale u sheeg cinwaankaaga hadda iyo macluumaadkaaga xiriirka (lambarka telefoonka, e-mailka), iyo wixii isbeddel ah si ay kuu soo xiriiri karaan mar walba.

# MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?



Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda iyo Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka waxay qiimeyn doonaan xaaladdaada, waxayna go'aansan karaan inay yareeyaan ama joojiyaan noocyo ka mid ah taageerada.

Ilaalada Xuduudaha ee Dawladda iyo Xafiiska Muwaadinimada iyo Arrimaha Socdaalka waxay si qoraal ah kuugu wargelin doonaan go'aankaas, waxayna si cad u sheegi doonaan taageerada la yareynayo ama la joojinayo.

## Fiiro gaar ah!


**Waxaad heli kartaa taageero yar**, tusaale ahaan, haddii:

- waxaad ka baxdo gobolka juqraafiyeed ama goobta gaarka ah ee, sida ay maamulka u go'aamiyeen, lagaa rabo inaad ku sugnaato adigoon fasax haysan;
- aanad la shaqeyn maamulka;
- aad ka been sheegtid meelaha dhaqaale kaasoo galo;
- aad jabisid shuruucda goobta aad joogtid
- aad marhoreba codsatay magangalyada waddan EU+ oo kale waanad ka tagtay wadankaasi;
- waxaad ka baxdaa xarunta hoyga magangalyo-doonka adigoon fasax haysan;
- waxaad ku guul darreysataa inaad bixiso cinwaankaaga hadda, lambarka taleefanka, ama ciwaanka iimaylka.

**Waxaad waayi kartaa caawimada aad helaysid** ihaddii aad noqotid rabshadle, haddii aad u hanjabtid dadka kale ama haddii aad jabisid sharciga goobta aad adigu joogtid markasta ama si darran. Xaaladani, booliiska ayaa sidoo kale la wici karaa si ay u farogaliyaan.



## MAXAA DHACAYA HADDII AAD U SAFARTID WADDAN EU+ OO KALE BILAA FASAXA MASUULIYIINTA?




**Latvia:**

- habraacaaga magangalyo doon waxaa laga yaabaa in la joojiyo.

**Wadanka EU+ ee aad u safartay bilaa fasax:**

- masuuliyiintu waxay go'aansan karaan inay kugusoo celiyaan wadanka aad ka tagtay bilaa fasax

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli **doontid adeeggyo badan iyo noocyo taageerada ah**
- laguuma **oggolaan doono inaad ka shaqayso**
- laguuma **oggolaan doono inaad kaqeybgashid koorasyada luuqada ama casharo lagu barto xirfado cusub.**

## MAXAA DHACAYA MARKA DIB LAGUUGUSOO CELIYO DALKA KALE OO KA TIRSAN EU+ WADDAN AH OO AAD KA TAGTAY BILAA FASAX?



Masuuliyiinta ayaa go'aamin kara inaad xaq u leedahay inaad joogtid goob gaara oo joogitaankaaga ayaa loo hubin doonaa si joogto ah. Waxaad awoodi doontaa inaad ka baxdo meeshaas iyadoo la raacayo xaddidaadyo gaar ah.

# WAXAAD KA QAADAN KARTAA RAFCAAN GO'AANKA MAAMULKA



Haddii Ilaalada Xuduudda ee Gobolka ama Xafiiska Arrimaha Muwaadinnimada iyo Socdaalku ay go’aansadaan inay xaddidaan xuquuqdaada codsade ahaan, adiguna aad aaminsan tahay in tani ay cadaalad-darro tahay, **waxaad racfaan ka qaadan kartaa go’aankaas.**

Waxaad racfaan ka qaadan kartaa haddii Ilaalada Xuduudda ee Gobolka ama Xafiiska Arrimaha Muwaadinnimada iyo Socdaalku:

- uma lihid xaq hoy iyo caawimo soo-dhaweyn kale;
- si loo yareeyo ama loo joojiyo caawimada soo-dhaweynta ee lagu siiyey;
- ay go’aansadaan inaysan oggolaan codsi lagu dalbanayo in si ku-meelgaar ah looga baxo gobol gaar ah ama meel gaar ah;
- waxa kugu waajib ah inaad joogtid goob gaara (tusaale ahaan xarun soo-dhaweyn oo gaara) oo waxaad ku bixi kartaa xannibaado kooban;
- ay go’aansadaan inay ku xiraan.

Haddii aad u safartay waddan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta oo aad wayday xuquuqo soo-dhaweyn gaara halkaasi, waxaad kaga qaadan kartaa rafcaan go'aankan dalkaasi.

Haddii Ilaalada Xuduudda ee Gobolka ama Xafiiska Arrimaha Muwaadinnimada iyo Socdaalka ee Latvia ay go’aansadaan inay yareeyaan ama ay joojiyaan taageerada gelitaanka ee lagu siiyo sababo la xiriira xaaladaha lagu sharaxay bogga 20, waxaad yeelan doontaa xuquuqo gaar ah. Tusaale ahaan, waxaad awoodi doontaa inaad aragto dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad, aad hesho daryeel caafimaad, iyo in lagu siiyo noocyo ka mid ah taageerada sida cunto, agabka nadaafadda, iyo hoy, sida ay go’aamiyaan mas’uuliyiintu.

Nooca caawimada waxay ku xidhnaan doontaa xaaladahaaga iyo baahiyahaaga gaarka ah.

Marka maamulka waddan EU+ oo aad u safartay bilaa fasax go'aamiyo inuu joojiyo caawimada soo-dhaweynta lagu siiyey, nooca caawimada aad wali heli doontaa waxay ku xidhnaan doontaa xaaladaada iyo baahiyahaaga gaarka ah.

## WAXAAD HELI KARTAA CAAWIMO SHARCI



Haddii aad rabto inaad racfaan ka qaadato go’aanka mas’uuliyiinta ee lagu xaddidayo xuquuqdaada gelitaanka maxkamadda, waxaa laga yaabaa inaad hesho caawimaad sharci oo bilaash ah iyo wakiil sharci, iyadoo ku xiran xaaladdaada.

Tani waxay ka dhigan tahay in la-taliye sharci ama qareen uu ku caawin doono. La-taliyeyaasha sharci ama qareennadu waxay bixiyaan caawimaad sharci oo maxkamadeed, waxay difaacaan danahaaga, waxayna ka madax bannaan yihiin mas’uuliyiinta iyo garsooraha.

Waxaad sidoo kale la tashan kartaa lataliye sharci ama looyar adigu aad isku qabto kharashkiisa.




Ilaalada Xuduudda ee Gobolka iyo Xafiiska Arrimaha Muwaadinnimada iyo Socdaalka ayaa ku wargelin doona sida aad racfaan uga qaadan karto go’aankaas.

Waxaad markasta weydiin kartaa masuulyiinta, haayadaha aan dawliga ahayn ama UNHCR wixii macluumaad muhiima, oo ay kujiraan caawimada sharci iyo matalaada bilaashka ah.

# FAAHFAAHINTA HALKA LAGALA XIDHIIDHAYO

Haddii aad qabtid wax su'aala ama aad u baahan tahay taageero inta lagu jiro joogistaada, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha ka tirsan:

| xarunta gelitaanka | |
|---|---|
| | **Ilaalada Xuduudda ee Gobolka**<br>Ciwaanka: Rūdolfa iela 5, Riga<br>tel.: +371 67913300<br>e-mail: pasts@rs.gov.lv<br>https://www.rs.gov.lv/<br>**Xafiiska Arrimaha Muwaadinnimada iyo Socdaalka**<br>Cinwaan: Čiekurkalna 1. līnija 1, k-3, Riga<br>tel.: +371 67209400<br>e-mail: pasts@pmlp.gov.lv<br>https://www.pmlp.gov.lv/ |

Waxaad sidoo kale laxidhiidhi kartaa ururadan, si aad u hesho su'aalaha la xidhiidha:

| taageerada caafimaad | |
|---|---|
|  | **Adeegga Caafimaadka Qaranka**<br>Ciwaanka: Cēsu iela 31 k-3, entrance 6, Riga<br>tel.: +371 80001234<br>e-mail: nvd@vmnvd.gov.lv<br>https://www.vmnvd.gov.lv |

## taageerada bulsheedka



**Lambarka gurmadka qalalaasaha ee bilaashka ah ee mideysan: 116 123**

Loogu talagalay in lagu bixiyo taageero nafsi iyo shucuureed dadka waaweyn, sidoo kale waxaa lagu siinayaa fursad aad isku diiwaangelin karto la-talin bilaash ah oo uu bixiyo cilmi-nafsi yaqaan. Taageerada waxaa lagu heli karaa luqadaha Latvian, English, iyo Russian.
Tel.: 116 123

## latalin sharci, kaalmada iyo matalaada



Maamulka Maxkamadaha
Ciwaanka: Antonijas iela 6, Riga
tel.: +371 67063800
e-mail: pasts@ta.gov.lv
https://www.ta.gov.lv/

| | |
|---|---|
| **UNHCR (Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga)** | Ciwaanka: Antonijas iela 9, Riga<br>tel.: +46 10 101 28 00<br>e-mail: swest@unhcr.org<br>https://www.unhcr.org/ |
| **Aasaaska Isdhexgalka Bulshada Adeeg Hal-joogsi** | Xarumaha adeegga macaamiisha Adeeg Hal-joogsi<br>Ciwaanka:<br>Raiņa bulvāris 15, Riga, tel.: +371 26959706<br>Rožu iela 6, Liepāja, tel.: +371 22811020<br>Ģimnāzijas iela 11, Daugavpils, tel.: +371 29557630<br>https://livelatvia.lv/ |
| **Xarunta Xuquuqda Aadanaha ee Latvia** | Ciwaanka: Alberta iela 13, Riga<br>tel.: +371 67039290<br>e-mail: office@humanrights.org.lv<br>https://cilvektiesibas.org.lv/ |

Haddii ay dhacdo in adigoo jooga meel ka baxsan halka aad degan tahay oo aad shil la kulanto ama aad halis gasho, waxaad wici kartaa lambarkan gargaarka degdega ah/ lambaradan gargaarka degdega ah si bilaash ah:

**adeegyada caafimaadka degdegga ah iyo booliska: 112**

# QORAALADAYDA

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025